

Natiijo BAADHIS DHEERAAD AH: Ogaysiinta Natiijada Baadhista Maqalka

Barnaamijka Baadhista
Dhawaan-dhaladka
Minnesota



Ilmahaagu ma gudbin baadhista maqalka.

Tani waxay ka dhigan tahay in ilmahaagu u baahan yahay baadhis dheeraad ah si loo hubiyo inuu si fiican wax kasta u maqlayo. Fadlan u keen xaashidan bixiyaha koowaad ee daryeelka ilmahaaga booqashadaada ilme ee u horraysa.

Feejignaanta Bixiyaha Koowaad ee Daryeelka (ATTN: Primary Care Provider): _____

Rugta (Clinic): _____

Magaca Ilmaha (Baby's Name): _____

Taariikhda Dhalashada Ilmaha (Baby's Date of Birth): _____

Barta Cusbitaalka/Dhalmada (Hospital/Birth Site): _____

Taariikda Baadhistii Maqalka ee u Dambaysay (Date of Last Hearing Screen): _____

Dhagta Midig (Right Ear): GUDBISTA (PASS) Dhegta Bidix (Left Ear): GUDBISTA (PASS)
 U GUDBIN BAADHIS U GUDBIN BAADHIS
DHEERAAD AH (REFER) DHEERAAD AH (REFER)

FIIRO: Ballan la socodka baadhista maqalka ayaa la qabtay:
(An appointment for hearing follow-up testing/rescreening was made:)

Taariikhda iyo wakhtiga (Date and Time): _____

Goobta (Location): _____

Tallaabooyinka xiga:

- 1 Xaadir ballanta la socodka ee sare ku xusan. Haddii aanad awoodin inaad xaadirto ama haddii ayna jirin ballan sare ku xusan, kala hadal bixiyahaaga qabashada ballan kale – sida fiican 2 ilaa 4 toddobaad gudahood ee dhalashada (ama sida caafimaad ahaan suurogal u ah qalinjabiyayaasha NICU).
- 2 Keen ogaysiiskan natiijada booqashadaada u horraysa ee rugta cafaimaadka kalana xaajoo bixiyaha koowaad ee daryeelka ilmahaaga. Haddii wax ballan la socod aan la qaban wakhtigan, bixiyaha daryeelka ilmahaaga ayaa kaa caawin kara inuu ballan kaaga qabto dhakhtarka maqalka.
- 3 Waydii bixiyaha koowaad ee daryeelka ilmahaaga iyo dhakhtarka maqalka wixii aad su'aalo qabi karto ee kusaabsan maqalka ilmahaaga. Marka si dhakhso ah loo ogaado maqal beelka, waa marka ilmaha maqalka beelay uu si dhakhso ah u heli karo caawimo una bilaabi karo kobcinta hadalka muhiimka ah iyo xirfadaha luuqadda.

Macluumaadka Waalidka: Maqalka Ilmahaaga

Galaangal u yeeladka luuqaddu waa aasaaska awooda ilmaha ee inuu wax barto, markaa waxa muhiim ah inaad aqoonsato wixii dhibaato maqalka khuseeya sida ugu dhakhsaha badan. Hadalka iyo luuqaddu waxay bilaabaan inay koraan dhalashada, in kastoo carruurta inta badan ayna hadlin ilaa hal sano jir ay gaadhaan. Ilmaha maqalka beelay waxa ku adkaan kara hadalka iyo luuqadda haddii maqal beelka aan xilli hore la aqoonsan.

Haddii aan baadhista maqalka la marin, maqal beelka inta badan ma ogaan karaan waalidka ama bixiyayaashu ilaa dib-dhacyo koboceed ay dhacaan. Baadhista iyo la socodku waa qaababka kaliya ee xilli hore lagu ogaan karo maqal beelka. Ogaanshaha haddii ilmahaagu uu maqal beelay waxay kaa caawin adiga iyo ilmahaaga inaad heshaan qaababka ugu fiican ee aad u wada xidhiidhaysan iyo inaad ka dheeraataan dib-dhacyo.



Natiijada GUDBINTU ma waxay ka dhigan tahay ilmahaagu inuu maqal beelay?

Natiijada GUDBINTA (baadhista dheeraadka ah) khasab ma aha inay ka dhigan tahay in ilmahaagu uu maqal beelay, laakiin waxay ka dhigan tahay in ilmahaagu u baahan yahay baadhis dheeraad ah si aad loogu xaqiijiyo. Carruurta leh natiijada GUDBINTA (baadhista dheeraadka ah) waxay u baahan yihiin inay la kulmaan dhakhtar maqal sida ugu dhakhsaha badan. Dhakhtarka maqalku wuxuu samayn doonaa baadhitaano dheeraad ah oo buuxa si uu u ogaado haddii ilmahaagu maqal beelay, inta uu leeg yahay, iyo waxa la samayn karo si loo caawiyo.

Waxa jira sababo dhawr ah sababta ilme u yeelan karo natiijada GUDBINTA. Wax kasta oo ay sababtu tahay, la socod joogto ah ayaa muhiim ah.

Ma ku hubin karaa maqalka ilmahayga guriga?

Maya – baadhista maqalka ee gurigu kuuma sheegi karto haddii ilmahaagu maqal beelay. Carruur badan oo maqal beelay waa u soo jeedsan karaan codadka sare xiitaa marka ayna maqli karin codadka dabacdasan. Si aad u ogaato haddii ilmahaagu uu maqal beelay heerka hadalka la maqlo, ilmahaagu waa inuu maraa baadhista maqalka aanu bukaanu saamaynta ku lahayn si loo cabbiro jawaabtiisa codka.

Kawaran haddii ilmahaygu uu leeyahay natiijada GUDBINTA hal dhag?

Carruurta hela natiijada GUDBINTA hal dhag wali waxay u baahan yihiin inay la kulmaan dhakhtarka maqalka si uu baadhis dheeraad ah ugu sameeyo. Xiitaa maqal beelka dhag kaliya waxay keeni kartaa dib-dhacyo koboceed haddii aan hore loo dareemin.



IC# 140-2911
Rev: 07/2014

Ma haysaa su'aalo dheeraad ah oo kusaabsan baadhista maqalka?

Ha ka yabaalin inaad wacdo Barnaamijka Baadhista Dhawaan-dhaladka (800) 664-7772 ama internetka nagu soo soo booqo www.health.state.mn.us/newbornscreening

